Xafiiska Helitaanka Luuqadda
Habka Cabashada Helitaanka Luuqadda (Office of Language Access)

Dokumentigan wuxuu faahfaahinayaa tallaabooyinka dacwooduhu uu qaadi karo si uu u sheego ku-fashilanka maxkamad maxalli ah inay u samayso tarjumaan ama siiso kaalmo luuqadeed oo kale dhacdo la xidhiidha maxkamadda. Dacwooduhu wuxuu fayl garaysan karaa cabasho la xidhiidha arrin kasta oo la xidhiidha helitaanka luuqadda ee la macaamilka dacwoodaha ee Maxkamadda Caddaaladda Kentucky (Kentucky Court of Justice). Fadlan ogow fayl garaysiga cabasho helitaanka luuqadda ma keento rafcaan ee wixii go'aan ama amar ku lammaan. **Marka uu dacwooduhu codsado, Xafiiska Helitaanka Luuqadda (Office of Language Access) wuxuu siin doonaa adeegyo helitaanka luuqadda oo habboon, oo ay kujirto helitaanka tarjumaan, si uu uga caawiyo dacwoodaha dhammaytirka habka dacwadda.**

1. Bilaabista Dacwad. Qofku wuxuu fayl garaysan karaa cabasho isagoo qaadaya tallaabooyinka soo socda:

• Cabasho ayaa lagu fayl garaysan karaa oo lagu gudbin karaa onlayn iyada oo la buuxinayo **foomka cabashada onlaynka ah**.

• Cabashada waxa lagu fayl garaysan karaa taleefanka iyada oo la wacayo 502-573-2350 oo la waydiisanayo in loo wareejiyo Xafiiska Helitaanka Luuqadda. Iyadoo la kaashanayo tarjumaan, wakiil ka socda Xafiiska Helitaanka Luuqadda ayaa si khaas ah ula hadli dacwoodaha oo qaadi macluumaadka daruuriga ah si loo bilaabo habka dacwadda.

• Dacwadda waxa lagu fayl garaysan karaa qoraal iyada oo loo dirayo warqad cabasho cinwaanka soo socda:

Administrative Office of the Courts
Attention: Office of Language Access
1001 Vandalay Drive
Frankfort, KY 40601

2. Qaadashada. Xafiiska Helitaanka Luuqadda wuxuu eegi doonaa cabashada wuxuuna ka heli doonaa dhammaan macluumaadka la xidhiidha dacwoodaha. Haddii, qaadashada hore, cabashada la go'aamiyo inay macne leedahay, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu u-xilsaari dacwadda lambar qaadasho oo loogu talogalay raadraaca iyo fayl garaynta. Haddii, hase yeeshee, cabashada la go'aamiyo inayna macne lahayn marka qaadashada, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuu laali doonaa cabashada wuxuuna ku wargelin dacwoodaha in tallaabo kale aan la qaadi doonin.

3. Qiraalka Cabashada. Marka laga reebo xaaladda arrimaha wakhti ahaan nugul, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu ugu jawaabi dacwoodaha 10 maalin shaqo gudahood isagoo adeegsanaya warqad, iimeyl, ama taleefan si uu u qiro helitaanka cabashada. Xafiiska Helitaanka Luuqaddu waxa sidoo kale dhici karta inuu ka codsado macluumaad iyo/ama caddaymo dheeraad ah dacwoodaha wakhtiga qiraalka si uu si gabi ahaana ugu baadho cabashada. Marka dhacdadu tahay mid wakhtiga u nugul (tusaale, cabasho la xidhiidha dhegaysi soo socda ayaa la muddeeyey kahor dhammaadka 10 maalin shaqo), Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu ka shaqayn inuu dedejiyo qiraalka iyo baadhitaanka ku xiga ee cabashada si uu ugu xalliyo arrinkii sax ah wakhtiga ku habboon.

4. Ogaysiinta Maxkamadda Maxalliga ah. Marka uu helo dhammaan macluumaadka iyo/ama caddaymaha uu codsaday, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu u diri doonaa warqad maxkamadda maxalliga ee cabashada laga gudbiyey si uu u ogaysiiyo maxkamadda in cabasho la helay. Dhammaan tafaasiisha la xidhiidha ee khusaysa cabashada ayaa lagu qori doonaa warqadda. Fadlan ogow in dhammaan cabashooyinka la xidhiidha shaqaale ama qandaraasle Xafiiska Helitaanka Luuqadda waxa lagu maarayn doonaa iyada oo la adeegsanayo borotokoolka edbinta shaqaalaha gudaha ee Xafiiska Maamuleed ee Maxkamadda Kentucky leedahay (Kentucky Administrative Office of the Courts).

5. Baadhitaanka Cabashada. Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu bilaabi doonaa baadhitaan kusaabsan eedaymaha lagu sheegay cabashada 10 maalin shaqo gudahood kadib marka la ogaysiiyo maxkamadda maxalliga helitaanka cabashada. In kastoo habka baadhiseed uu kala duwanaan doono iyadoo lagu salaynayo tafaasiisha cabasho kasta, hawlaha suurogalka ah waxa kujira waraysiga kaqaybqaatayaasha cabashada, oo ay kujiraan qaadiyada, karraaniyada iyo tarjumaanada, iyo qoraal ka samaysiga dhammaan macluumaadka la ururiyey inta waraysigu socday.

6. Eegista Xafiiska Adeegyada Sharciga (Office of Legal Services). Marka uu dhammaado baadhitaanku, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu u gudbin natiijooyinkiisa, oo ay kujiraan dhammaan wixii qoraalo iyo xalal la soo jeediyey ah, Xafiiska Adeegyada Sharciga si loo eego. Iyadoo lagu salaynayo tilmaanta uu bixiyo Xafiiska Adeegyada Sharciga, Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu fari maxkamadda maxalligu inay fuliso xalka la soo jeediyey, soo jeedin in maxkamadda maxalligu fuliso xal cusub, amase u sheegi maxkamadda maxalliga in cabashadu tahay mid bilaa macne ah. Maxkamadda maxalliga waxa looga baahan inay ka fayl garayso warbixin horumar Xafiiska Helitaanka Luuqadda kadib fulinta wixii xal la soojeediyey.

7. Ogaysiinta Dacwoodaha. Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu u diri doonaa warqad dacwoodaha 10 maalin shaqo gudahood laga bilaabo helitaanka warbixinta horumarka si uu ugu faahfaahiyo tallaabooyinka ay maxkamadda maxalligu fulinayso iyadoo xallinayso cabashada.

8. Kayd-xogeedka iyo Helitaanka Dadwaynaha. Xafiiska Helitaanka Luuqaddu wuxuu yeelan kayd-xogeed cabashooyinka ah iyo tallaabooyinka la qaadayo si loo xalliyo, dadwaynaha ayaana heli doona marka ay codsadaan.

9. Mamnuucidda Aargoosiga. “Helaha ama qof kale waa inaanu cabsi-gelin, handadin, qasbin, ama ku takoorin qofna farogalinta wixii xuquuq ama mudnaan uu bixiyo Title VI, ama inuu sameeyey cabasho, marag-fur, kaalmayn, ama uga qaybqaatay si uun baadhitaan, dacwad ama dhegaysi marka la eego qayb-hoosaadkan.” 28 C.F.R. § 42.108(e)